

(Article: Comments on the Press Law, the Penal Code and Court Cases against the Press)

FAALLO: Xeerka Saxaafadda, Xeerka Cigaabta Guud iyo Dacwaddaha Saxaafadda.

Qalinkii: Cabdishakuur Cali Muxumed (Good Lawyer)

Email: goodlawyer2014@gmail.com

Blog: www.goodlawyer4.blogspot.com

Burco, Somaliland.

Taariikh: 26/04/2014

Waxaa xaqiiqo jirta ah in saxaafadda xad-gudub loo geysto iyaduna ay geysato; waxaynu wada ognahay in xukumad kasta oo Somaliland soo martey ay isku xumaayeen saxaafadda. Waxaa jooqta ah eeddaha iyo dhaleecaynta ay isku jeedinayaan xukumadda iyo saxaafaddu. Dulucda khilaafkooduna waxay ku kooban tahay dhinac aan rabin inuu sharcigu qabto oo xadhko goys ah iyo dhinaca kale oo iyaguna xeerkey doonaan qabadsiinaya iyagoo garsoorka adeegsanaya, siday doonaana ugu tacadiyaya. Waxaa weliba jirta oo weligeed jiraysay in xukumaddahii kala dambeeyey ay markasta adeegsadaan saxaafadda lafteeda si ay ugu tacadiyaan isla saxaafadda. Haseyeeshee, imika ujeeddadeenu maaha innaynu falan-qayno khilaafaadka ka dhex dhaca saxaafadda iyo xukumadda. Ujeeddada ugu muhiimsan ee qoraalkani waa in aynu falan-qayn ku sameyno Xeerka Saxaafadda iyo Xeerka Cigaabta; kala mudnaantooda sharci iyo xidhiidhka ay la leeyihiin eedaynta ama dacwad-oogista lidka ku ah suxufiyiinta.

Xeerka Saxaafadda

Xeerka saxaafadda Somaliland oo loogu yeedho Xeerka Saxaafadda (Xeer Lr. 27/2004)¹ Wuxuu Golaha Wakiilladu ansaxiyey 18-kii Jeenaweri 2004-tii. Haseyeeshee, xeerkan waxaa markii ugu horeysay la horkeenay Golaha Wakiillada sannadkii 1997-dii. Mashruuc-sharcigaasi 1997-kii oo loogu yeedhi jiray "Xeerka Warfaafinta" waxaa laga soo dheegtay Xeerka Saxaafadda ee ay dawladda Itoobiya samaysatay sannadkii 1992-kii². Xeerkanii Itoobiya oo dawladda u ogolaanaya inay xadhig u geysato suxufiyiinta³ ayey hay'addaha xuquuqaha aadamuhu aad uga qayliyeen, kana soo saareen warbiximooyin dhiileysan, warbixinahaasi waxaa kamid ah warbixintani hay'adda xuquuqal insaanka ee Human Rights Watch ay soo saartey 10-kii March 2010-ka ee la yidhaahdo **Boqolka Hab ee Caddaadis Saarista (One Hundred Ways of Putting Pressure)**⁴. Haddaba, mashruucaasi sharci ee 1997-kii waxaa ku jiray qodobbo badan oo xusaya dembiyo cigaab ah oo saxaafadda qabanaya iyo kuwo toos uga hor imanaya xoriyatul-qawlka. Sidaas darteed hay'addaha warbaahinta iyo ururada xuquuqaha aadamuhu aad bay uga qayliyeen. Waxaanay ku guuleysteen inuu mashruucaasi sharci socon waayo. Sannadahii 1999-ka iyo 2003-dii ayaa dib loo soo celiyey.

¹ Qodobka 1aad ee Xeerka Saxaafadda (Xeer Lr. 27/2004).

² SOMALILAND FORUM: WARQAD FURAN OO KU SAABSAN XEERKA SAXAAFADDA (oo la diray July 2003) ka akhri halkani http://somalilandlaw.com/SF_Second_Submission_on_Press_Law_Somali_Jan_04.htm

³ Sida ku cad halkani mareegta macluumaadka ee Internet-ka http://en.wikipedia.org/wiki/Media_in_Ethiopia

⁴ "One Hundred Ways of Putting Pressure", Human Rights Watch report, released 10 March 2010

Sidii oo kale ayey haddana hay'addaha warbaahinta, ururada xuquuqaha aadamaha iyo kuwa dimuqraadiyadda Somaliland u dooddaa uga horyimaadeen iyagoo ku dooddaya inay khalad tahay in dalka laga hirgeliyo mashruuc-sharcigani ku saleysan xeerkani ka midka ah kuwa ugu xun adduunka.⁵

Ugu dambeyn, waxaa xeerkani saxaafadda la ansaxiyey 18-kii Jeenawari 2004-tii, iyadoo arrimahii ay warbaahintu ka cabanaysay badankooga meesha laga saaray. Haseyeeshee, arrimo dhawr ah oo aad looga walaacsanaa ay ku jiraan. Arrimahaas waxaa kamid ahaa in xeerkani uu khuseeyo dhammaan saxaafadda oo dhan; ta qoraalka ah, Raadyoowga, Telefishanada IWM. Waxaana wanaagsanayd inay dhawr xeer kala yeeshaan oo aan dusha layska saarin. Waxaa iyadna aad loola yaabay in xeerkani uu ereyga "saxaafad" ku qeexayo sidan:

“**Saxaafad**’ micnaheedu waa abuuridda hawlqabad kasta oo saamaynaya maskaxda iyo fikrad[d]aha dadweynaha oo dhan, sida: wargeysyada, joornaallada, qoraallo xiliyeedyo, wakaalladdaha wararka, raadiyaha, telefishanka, filimada la daawado, (filimo & video), masawirada, kartoonaada, buuggaga, miyuusiga iyo wax kasta oo loogu talo galo isku xidhiidhinta wadareed (mass communication).”⁶

Waxaa markaasi aad loo daneynayey oo xitaa Gollaha Guurtida loo soo jeediyey in qeexiddani lagu soo soo koobo saxaafadda qoraalka ah (press) iyo tan hawada ah (broadcasting) oo laga reebo filimada, fiidyaha, masawirada, buuggaga, miyuusiga IWM⁷. Haseyeeshee, laguma guuleysan.

Muhiimada Xeerka Saxaafadda

Xeerkani waa sharci ka soo baxay baarlamanka Jamhuuriyadda Somaliland, waana sharciga ugu mudan shuruucda dalka lagaga shaqeeyo marka laga hadlayo arrimaha saxaafadda. Sida ku xusan Qodobka 31aad ee xeerkani ‘*xeer kasta, sharci kasta, wareegto kasta iyo amar kasta oo xeerkani khilaafsani way burayaan*’. Waxaa markaasi saxaafadda loo eeddaynayaa si waafaqsan xeerkani saxaafadda.

Qodobka 3aad ee xeerkani ayaa xaqiijinaya xoriyadda saxaafadda iyo xuquuqda isku abaabulka ururo xirfaddeedyo leh dallad guud iyo xeer-hoosaad anshax oo mideysan. Waxaanu qodobkani mamnuucayaa cabudhinta saxaafadda iyo wax kasta oo loo qadan karo faaf-reeb.

Qodobka 10aad ee xeerkani ayaa saxaafadda ku waajibinaya u hoggaansanaanta xeerkani saxaafadda sida xaqiijinta wax soo saarka saxaafaddeed ee runta ah, xafidaada iyo ilaalinta sirta ciidamada qaranka. Qodobkani wuxuu saxaafadda ka reebayaa faafinta muuqaalo

⁵ Eeg lambarka 2aad.

⁶ Qodobka 2aad ee Xeerka Saxaafadda (Xeer Lr. 27/2004)

⁷ FAALLO KU SAABSAN XEERKA SAXAAFADDA EE HADDA LA ANSAXIYEY, Somaliland Forum, 9 Feberweri 2004. Ka akhri halkani http://somalilandlaw.com/SF_Third_Submission_on_Press_Law_Somali.htm

anshax-xumo oo qaawani ah, iyo baahinta faallooyin iyo maqaallo lagu ceebaynayo ku dhaqanka iyo karaamada diinta islaamka iyo bixinta cashuurta ruqsada.

Qodobbo kale ayaa saxaafadda ka reebaya inay ku kacaan fal xad-gudubyo ku ah xoriyadda gaarka ah ee shakhsiyaddeed. Tusaale ahaan, Qodobka 15aad wuxuu saxaafadda ka mamnuucayaa inay daba-gasho nolosha gaarka ah ee qofka isaga oo aan ogayn ama inay sawiro qarsoodi ah ka qaadaan isagoo ku sugan hoy gaar ah. Qodobka 17aadna wuxuu mamnuucayaa in la baahiyo waxyaabo si qarsoodi ah loo duubay ama baasisada dadka. Qodobbada 23aad, 24aad iyo 25aad waxay caddeynayaan inay saxaafadda ka reeban tahay wareysiga iyo ka warbixinta dacwaddaha carruurta, dadka dhibaneyaasha la fara-xumeeyey ah iyo aabbe-laaweyaasha.

Qodobka 30aad ee xeerkani ayaa saraakiisha dawladda ku waajabinaya inay la shaqeeyaan oo gacan siiyaan saxaafadda. Waxaanu sidoo kale xukumadda ku waajabinayaa inay dhiir-galiso saxaafadda isla markaana taakulayso intii macquul ah.

Guud ahaan, xeerkani waa mid xaqiijinaya xoriyadda saxaafadda, isla markaana waajibaad dusha ka saaraya saxaafadda; wax ka reebaya, waxna ka mamnuucaya inay ku kacdo. Sharci ahaan, xeerkani waxaa loogu talo-galay in lagu ilaasho xuquuqaha dastuuriga ah ee rayi dhiibashada, fikirka xorta ah iyo saxaafadda xorta ah. Waxaanay ujeeddadiisu tahay in la helo saxaafad xor ah oo loo sameeyey min-qiyaas lagu xakamayn karo hawl-gudashadeeda.

Meelaha uu xeerkani gal-daloolada ku leeyahay waxaa ugu muhiimsan in xeerkani aanu si hufan oo wax ku ool ah u caddeynin qaabka loo wajahayo dacwaddaha khuseeya hawlaha saxaafadda. Tusaale ahaan, Qodobka 10aad faqraddiisa 6aad waxaa lagu sheegay in saxaafadda ku xad-gudubta faqraddaha qodobkani (xaqiiqinta wax soo saar run ah, ilaalinta sirta ciidamada, faafinta muuqaalo anshax-xumo ah iyo ceebaynta ku dhaqanka diinta islaamka IWM) loo raacayo anshax-marinta ku xusan xeer-hoosaadka anshaxa saxaafadda iyo xeerarka madaniga ah ee dalka ee falkoodu khuseeyo. Waxayse dhibtu tahay waajibaadka saxaafadda qodobkani oo keliya kuma xusna ee qodobbada kale ee aynu kor ku soo sheegnayna wuu ku xusan yahay, haddaba, marka saxaafaddu ay ku xad-gudubto qodobbada kale ee xeerkani maxaa la yeelayaa? Ilayn faqraddani kor ku xusan arrimaha Qodobkani 10aad ku xusan ayaa gaar looga dhigaye? Xeerku waxba kamuu odhan waxa laga yeelayo xad-gudubyada lagu sameeyo qodobbada kale ee xeerkani.

Arrinta kale ee dhibaataadu ka taagan tahay waa xeer-hoosaadka anshaxa saxaafadda oo aanay wax anshax-marin ahi ku xusnayn. Hadda, waaba xeer-hoosaadka ay faqraddu ka hadlayso oo ee loo raacayo saxaafadda ku xad-gudubta arrimaha ku xusan Qodobka 10aad ee xeerkan. Waxay u muuqataa in saxaafaddii ka dagaalamaysay qodobbadii dacwaddaha khuseeyey ee xeerkani ku xusnaa xiligii uu baarlamanku ka doodayey, ay ku wacad furtay deddaaladii loo galay saxaafadda xorta ah oo markii xeerka la ansaxiyey ee la yidhi xeer-hoosaad anshaxeed oo idin qabta keena ay la yimaadaan xeer-hoosaadkani imika jira ee aanu ku jirin qodob qudha oo anshax-marin ah. Waa meeshani halka ay wax ka xumaadeen.

Dabadeed, waxaa timid in markasta oo saxaafadda dacwad loo qabsado ay ku dooddo xeerka saxaafadda ha la raaco; xeerkaa saxaafadda iyo xeer-hoosaadkii anshaxa saxaafadda midkoodna ma xusayo hal talaabo oo anshax-marin ah. Markaasi ayuu garsoorkuna isagoon u aabbo yeelayn ku qaadaa xeerka ciqaabta.

Sannaddihii 2007-dii iyo 2013-kii ayaa laysku dayey in xeerka saxaafadda wax ka badel lagu sameeyo oo la naax-naaxiyo. Haseyeeshee, labada jeerba saxaafaddu afka ayey gacanta saartay iyagoo ku dooddey in wax ka badelada lagu sameynayo xeerka saxaafaddu ay awooddo badan siinayaan Wasiirka Wasaaradda Warfaafinta oo uu ku xayiri karo, ku xidhi karo, kula wareegi karo wargeysyada iyo in dacwaddaha saxaafadda khuseeya loo raacayo xeerka ciqaabta iyo qodobbo kale oo xusaya ciqaab oo ku jiray wax ka badelka.⁸

Wax ka badelkii Golaha Wakiillada la hor keenay 4/11/2007, waxaa kelmad-kelmad⁹ looga soo dheegtay Xeerka Saxaafadda ee Yemen (Xeer Lr. 25/1990), oo xiligaasi; sannadihii 2005-ta ilaa 2007-da Yemen dhexdeeda deddaalo loogu jiray in la badelo.

Xeerka Ciqaabta

Xeerka Ciqaabta ee imika Somaliland lagaga shaqeyaa waa xeerka ciqaabta ee dawladdii Soomaaliyeed ee burburtay. Waxaa xeerka la qoray 1957-kii, markii uu Talyaanigu xukumayey Soomaaliya. Waxaa qortay “Maxkamaddii Caddaaladda ee Soomaaliya”. Waxaana laga soo dheegtay Xeerka Ciqaabta ee Talyaanigu qortay sannadkii 1930-kii, oo intii hore lagaga shaqayn jiray Soomaaliya. Markii uu midowgii Soomaliya iyo Soomaaliland dhacay ee la abuuray Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed, ayuu Golahii Baarlamaanka ee Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed soo saaray Sharci Lr.05 oo soo baxay 30-kii Jeenawari 1962-kii. Sharcigani wuxuu xukumadda awood u siiyey inay lix bilood gudahood ku soo diyaarisoo Xeerka Ciqaabta, Xeerka Habka Ciqaabta, Xeerka Taraafikada iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka. Kadibna guddi sharci-yaqaano ah oo loo saaray arrintani ayaa go'aamiyey in la qaato Xeerka Ciqaabta ee Soomaaliya lagaga shaqayn jiray, halka Xeerka Habka Ciqaabta laga dhigay kii Somaliland lagaga shaqayn jiray oo ahaa Xeerka Habka Ciqaabta ee Hindiya ay qoratey 1860-kii. Waxaa Xeerka Ciqaabta la ansaxiyey Diisember 1962-kii, waxaanu dhaqan-galay 3dii Abril 1964-kii.

Xeerka oo sidaynu sheegnay ka soo jeeda Xeerka Ciqaabta Talyaaniga oo la qoray 1930-kii ayeynu weli ku dhaqanaa. Runtii, waa xeer aan meelo kooban kala jaan-qaadi karayn shareecada Islaamka iyo dastuurkeena ba. Inkastoo maxkamaddahu aanay ku dhaqmin qodobbada badan oo si toos ah uga hor imanaya shareecada Islaamka iyo dhaqanka bulshadeena. Haseyeeshee, waa xeerka aynu ku dhaqano ee dalkeena dhaqan-galka ka ah.

⁸ Editors Condemnation of the 2007 bill, War-saxaafaddeedkii Tifaftirayaasha ee 11/11/2007. Halkani ka akhri http://somalilandlaw.com/press_media_law.htm#MediaBill

⁹ Ibraahim Hashi Jama, “Somaliland Media and Press Law” oo aan ka akhriyey 24kii Abriil 2014-ka halkani http://somalilandlaw.com/press_media_law.htm#MediaBill

Qodobka 130(5) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland ayaa jidaynaya in Somaliland lagaga dhaqmayo xeerarkii hore loogaga dhaqmi jiray xiligii Dawladdii Soomaaliyeed. Haseyeeshee, wuxuu qodobku ku xidhayaa shuruudo iyo muddo lagu dhaqmi karo oo ah in aanu xeerku ka hor-imanayn:

- 1) Shareecadda Islaamka.
- 2) Xuquuqda qofka iyo xoriyaadka aasaasiga ah.
- 3) Inta laga soo saarayo xeerar waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.
- 4) Waxaana lagu horkeenayaa xeer walba ugu yaraan muddada uu xaddido Gollaha Wakiilladu.

Dhammaan shuruuddahani way qabanayaan Xeerkani Ciqaabta; waa marka kowaade, Xeerkani Ciqaabtu wuxuu meelo badan kahor imanayaa Shareecadda Islaamka. Markaa waxay ahayd in aan lagu dhaqmin, laakiin markii la waayey xeer kale oo xiligaasi jira, waxaa lays tusay in inta aan waafaqsanayn Shareecadda Islaamka aan lagu dhaqmin, macquulna maaha oo haddii ay maxkamaddu ku dhaqanto qodob si toos ah uga hor imanaya Shareecadda Islaamka waxaa xukunkaasi lagu jebinayaa Maxkamadda Rafcaanka ama Maxkamadda Sare.

Waa marka labaade, xeerkani lama jaan-qaadi karo aragtiyahani casriga ah ee xuquuqaha aadamaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah. Xeerkani qoritaankiisii waxaa ka soo wareegtay qarni ku dhowaad. Talyaaniga oo sameystay ayaa waxyaabo badan ka badelay, tusaale ahaan Talyaanigu xukunka qisaasta wuxuu ku badeshay 21 sanno oo xadhiga ah. Arrimaha khuseeya ka ganacsiga jidhka (dhileysiga) xeer gaar ah ayuu u sameystayba. Arrimaha khuseeya kutiri-kuteenka (Propaganda) oo aynu innagu u cuskano Qodobka 215 ee xeerkani laguna qaado qofkasta oo wax dhaliila ama warbaahinta wax ka sheega, Talyaanigu waabu laalay oo wuxuu yidhi wuxuu ka horimanayaa xuquuqaha Dastuuriga ah¹⁰. Xeerka Ciqaabta ee Talyaanigu wuxuu maanta gaadhsiisan yahay heer uu Garsoorahu amri karo in maxbuuska xabsiga ku xidhan loo fasaxo inuu shaqaysto. Xeerkani waxyaabo badan oo uu ku ilaalinayo Saraakiisha Dawladda ayaan la jaan-qaadi karayn xuquuqaha muwaadiniinta ee Dastuurka ku xusan.¹¹

Waa marka saddexaade, Xeerkani Ciqaabtu wuxuu dhaqan-gal ahaanayaa inta uu baarlamaanka Somaliland soo saarayo xeer ciqaabeed Dastuurka waafaqsan. Arrimaha xeerkani ku qoran ee ay baarlamaanka Somaliland ka soo saareen xeerar gaar ah laguma dabaqi karo xeerkani oo qodobkani dastuuriga ah ayaa diiddaya. Qodobka 13aad ee Xeerkani Ciqaabtuna wuxuu dhigayaa in arrimaha ku wada xusan xeerkani iyo xeer gaar u ah

¹⁰ Martin R. Ganzglass, "The Penal Code of the Somali Democratic Republic with Cases, Commentary and Examples", Rutgers Press University, 1971.

¹¹ Ibrahim Hashi Jama, "Somali Criminal Laws: the Penal Code and other Criminal Laws" oo aan ka akhriyey 25ka, Abriil, 2014-ka halkani http://somalilandlaw.com/criminal_law.html

uu ku sareynayo xeerka gaarka ah sababtoo ah Xeerka Ciqaabtu waa sharci guud ahaaneed, halka xeerka gaar ahina uu u khaas yahay arrimo gaar ah. Tusaale ahaan, Xeerka Mukhaadaraadka Xeer Lr. 21/2002 wuxuu u khaas yahay arrimaha mukhaadaraadka iyo maan-dooriyaha, waxaanu laalayaa qodobbo ku jira Xeerka Ciqaabta oo khuseeya mukhaadaraadka iyo sakhrada, isaga ayaana uga mudan arrin kasta oo khusaysa mukhaadaraadka. Waxaa la mid ah Xeerka Nabad-geliyada iyo Xeerkani Saxaafadda ee aynu imika hadal hayno.

Xeerkani ciqaabtu wuxuu qabanayaa qof kasta oo muwaadin reer Somaliland ah. Weriyeyaasha iyo dadka saxaafadda ka hawl-galaana dadka ay la mid yihiin. Qofka saxaafadda ka hawl-galaa dembiga uu galo isagoon hawlaha saxaafadda gacanta kula jirin waxaa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta. Waxaynu badanaa isku xidhnaa qofka iyo mihnadiisa. Qofku inta uu hawlaha mihnadiisa hayo wuxuu leeyahay xuquuqda iyo waajibaad ay mihnaddaasi siinayso. Haseyeeshee, mar kasta qofka lalama xidhiidhin karo mihnaddiisa, waxaanu sharciga kala siman yahay muwaadiniinta caadiga ah. Markaa horta waxaa muhiim ah in aad loo tixgaliyo marka uu weriyahu iskii fal-dembiyeed u galo iyo marka uu sharciga ku gefo isagoo ku gudo jira hawlaha saxaafadda. Sharci ahaan, arrintani muhiimad gaar ah ayey leedahay, waxaase laga yaabaa saxaafadda iyo dadweynahuba in aanay fahamsanayn.

Sida ku xusan Xeerka Saxaafadda, xeer kasta, sharci kasta, amar kasta iyo qodob kastaba waxaa arrimaha saxaafadda uga mudan Xeerka Saxaafadda. Sidaas darteed, markay arrimaha saxaafadda noqoto Xeerka Ciqaabta waxaa ka mudan Xeerka Saxaafadda.

Runtii, dhibaataada imika taagani waxay ka dhalatay in saxaafaddu ay soo dhoob-dhoobatay xeer-hoosaad bilaa anshax-marin ah. Waxaana la qaldamay markii la yidhi idinku xeer-hoosaad soo sameysta. Dabcan, iyaga ayey tahay inuu xeer-hoosaadku ka yimaado, laakiin waxay ahayd inay xeer-hoosaadka sameyso Guddi Qaran (National Media Council) la aasaasi karayey oo la xisaabtan leh. Saxaafadduna may muujin waddaniyad iyo rabitaan ay u qabaan in ay jiraan wax dabar u noqda. Haddii xeer-hoosaadkooga uu ku dhignaana lahaa nidaam anshax-marineed oo la raaci karo, waxaa la dabaqi lahaa Qodobka 10(6) Xeerka saxaafadda oo waxaa la raaci lahaa xeer-hoosaadka. Imika se dhibtu waxay tahay xeer-hoosaadkii uu Xeerka Saxaafaddu dhigayey in lagu dhaqmo ma dhigayo wax anshax-marin ah, Xeerkii Ciqaabtuna wuxuu ku jiraa xeerarka uu burinayo Xeerka Saxaafaddu.

Dacwaddaha Saxaafadda

Waxaa badanaa saxaafadda lagu eeddeeyaa qodobbada Xeerka Ciqaabta, waxaana lagu sababeeyaa in Xeerka Saxaafaddu aanu dhigayn ciqaab iyo anshax-marin toona. Saxaafadduna waxay ku dooddaa in dacwadda hooga loo raaco Xeerka Saxaafadda iyo xeer-hoosaadkooga. Sida imika dhacdaa waxay u dhigan tahay in weriyuhu marka uu saxaafadda hawlaheega ku jiro iyo marka aanu ku jirin ba uu Xeerka Ciqaabtu isku si u qabanayo.

Waxaa muhiima in la fahmo in Xeerka Saxaafaddu uu yahay xeerka u gaarka saxaafadda uguna mudan markay noqoto arrimaha saxaafadda. Xeerka saxaafadda meelna kagama xusno fal-dembiyeedka uu suxufigu galo waxaa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta. Haseyeeshee, waxaaba ku xusan in saxaafadda ku xad-gudubta faqraddaha qodobka 10aad ee Xeerka Saxaafadda (xaqiiqinta wax soo saar run ah, ilaalinta sirta ciidamada, faafinta muuqaalo anshax-xumo ah iyo ceebaynta ku dhaqanka diinta islaamka IWM) loo raacayo anshax-marinta ku xusan xeer-hoosaadka anshaxa saxaafadda iyo xeerarka madaniga ah ee dalka ee falkoodu khuseeyo.

Waa muhiima in Maxkamaddaha hoose ay ku xisaabtamaan Qodobbada Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland ee khuseeya xuquuqaha aadamaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah. Maxkamadduhu waa in aanay il-duufin nuxurka Qodobka 32aad faqraddiisa 3aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaaliland oo u dhigan sidani:

“Saxaafadda iyo warbaahinta kale waxay ka mid yihiin xorriyaadka asaasiga ah ee ra'yi- dhiibashada, waxayna leeyihiin madax-bannaanidooda; way reebban tahay tallaabo kasta oo lagu cabudhinayo; hawshoodana xeer baa nidaaminaya”

Maxkamaddaha hoose marka dacwad kasta la horkeeno, gaar ahaan kuwa khuseeya saxaafadda, waa inay ku dhaqmaan talaabooyinkani hoos ku xusan:

1. Waa inay tixgelinta siyaan oo hubiyaan in dacwaddu aanay waxba u dhimayn xuquuqaha qofka iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee Dastuurku uu ilaashay.
2. Waa inay Maxkamaddu hubisaa xeerka Suxufiga lagu eedaynayaa ma buuxiyey shuruuddaha ku cad Qodobka 130(5) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland? Ma xeer kale oo ka mudan baa jira. Maaha in Xeer-ilaalinta iyo Xukumaddu ay doortaan xeerka iyo qodobka qofka qabanaya?
3. Waa inay Maxkamaddu ku dhaqantaa Qodobka 21aad ee Dastuurka oo ay hubisaa in aan wax loo dhimayn xuquuqaha iyo xoriyaadka uu Dastuurku dhigayo si waafaqsan bayaannada xuquuqaha aadamaha iyo xeerarka caalamiga ah ee Dastuurka ku xusan.
4. Haddii ay maxkamaddu u aragto in xeerka lagu eedaynayo qofku aanu waafaqsanayn ama ka hor-imanayo Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland ama aanu buuxinayn shuruuddaha ku cad Qodobka 130(5) ee Dastuurka, waa in iyadoo dabaqaysa Qodobka 15aad ee Xeerka Nidaamka Garsoorka dacwadda u gudbisaa Maxkamadda Dastuuriga ah si ay go'aan uga soo saarto.

Dacwaddaha saxaafadda khuseeya waxaa sidoo kale muhiima in lagu xisaabtamo in qofka saxaafadda ka hawl-galaa uu kaalin muhiima bulshada kaga jiro. Saddexda waaxood ee Qaranka, waxaa afar lagaga dhigaa warbaahinta sababtoo ah waxay ku hadashaa afka dadweynaha (saxaafaddu maaha meherad ganacsi iyo wax uu qof ku adeegto), waxaana loo

baahan yahay in saxaafadda danta guud ka hadlaysa la taageero, ta ummadda hadimaynaysana si sharci ah wax looga qabto.

Muranka dacwaddu marka uu yahay saxaafad wax ka qortay sarkaal qaran, waa in mudnaanta kowaad la siiyaa madax-bannaanida saxaafadda waayo shaqada saxaafadda waxaa ugu muhiimsan inay la socoto shaqada dawladda kana hadasho wixii khaldan iyo wax kasta oo danta qaranka dhibaataynaya. Saxaafaddu waxay ka faalloon kartaa talaabo kasta oo ay hay'addaha xukumaddu ku kacaan. Haddii sarkaalka ama hay'adda dawladda ee wax laga qoray uu soo dacwodo, waxaa wanaagsan in dacwad madani ah lagu dacweeyo saxaafadda. Waxaanay wadamada caalamka badankoogu isku raaceen in eeddaymaha ciqaabta ah ee khuseeyaa cayda ama sumcad-dilista dadka xilka hayaa ay dhiiri-gelinayso in saxaafadda la cabadhiyo oo cid kasta oo wax laga qoraa ay sheeganayso in la caayey ama sumcad-dilis lagu sameeyey. Arrimahani waxaa qurux badan in aan dacwaddo ciqaaba laga furin. Sharafta qofka masuulka ah waxaa lagu ilaalin karaa dacwad madani ah ama anshax-marin. Kadibna, haddii saxaafadda lagu helo waxaa lagu xukumi karaa ganaax badan. Kaasi oo aan waxba yeelayn xorriyaddii saxaafadda isla markaana culays saaraya saxaafadda gefka ku kacda.

Mida kale ee muhiimka ahi waxay tahay Qodobbada Xeerka Ciqaabta oo si kala duwan u saameeya xorriyadda saxaafadda. Tusaale ahaan, haddii saxaafadda lagu eeddeeyo qodobbada 451 iyo 452 Xeerka Ciqaabta oo ah cayda iyo sumcad-dilista, saxaafadda waxaa u bannaan in iyadoo adeegsanaysa Qodobka 453 ay soo bandhigto in warka ay sheegtay uu run ahaa. Haseyeeshee, Qodobbada ay kamid yihiin 268, 269 iyo 270 oo ah cayda Sarkaalka Dawladdeed, Waaxyaha Qaranka iyo Garsooraha oo badanaa lagu eeddeeyo saxaafaddeenu waxay gef ku yihiin xorriyadda saxaafadda sababtoo ah saxaafaddu ma helayso qodob kale oo ay isku difaacdo sida qodobka 453 oo kale oo ay caddeynayso in wixii ay sheegtay ay run ahaayeen, oo qodobbadani marka la joogo layskuma difaaci karo. Tusaale ahaan, haddii ay saxaafaddu sheegto in Sarkaal, xafiis dawladdeed ama Garsoore uu laaluush qaatey, kadibna ciddii warkani laga sheegay ay dacwooto oo dabadeed saxaafaddii lagu eeddeeyo qodobbadani midkood. Miyaanu xaqu ahayn in saxaafaddu ay isku difaaci karto caddeynta waxa ay qortay. Bal ka waran haddii ay caddeynayso in Sarkaalkaasi, Xafiiskaasi Dawladdeed ama Garsoorahaasi uu laaluush qaatey? Kee baa dambiile ah saxaafadda mise Sarkaalka? Saxaafaddu sida dadka ma caytando oo kelmadaha ay dadku isku caayaan ma adeegsato laakiin ficil ama fal ayey wax ku sifaysaa. Taasina waxaa ku filan in madani ahaan caddeynteeda laga dalbo oo haddii laga waayo mag-dhow looga qaado ciddii sumcadda laga dilay, laguna qasbo inay raali-gelin ku soo saarto warbaahinta. Tani faa'iiddada ay leedahay waxa weeyi in saxaafaddii khaldantay magdhow laga qaaday, isla iyadii lagu xukumay inay warkii beeniso, ciddii ay ku khaldantayna ay sumcaddeedii kordhayso. Waxaa hubaal saxaafadda sidaasi loola dhaqmaa in aanay mar dambe ku dhiirranayn in gefkaasi ku kacdo.

Garyaqaan Sare Ibraahim Xaashi Jaamac ayaa qoraal uu qoray sannadkii 2007-dii ku sheegay in Qodobka 220 ee Xeerka Ciqaabta oo dhawr jeer saxaafaddeena lagu xukumay uu

khilaafsan yahay 'dastuurkeena iyo nidaamka Madaxweynaha ee aynu qaadanay'. Qodobkani wuxuu dembi ka dhigayaa in meel fagaare ah Madaxweynaha sharaftiisa iyo sumcaddiisa meel loogaga dhaco ama dusha laga saaro eedaymaha ama masuuliyadda talaabooyinka xukumadda. Annigu waan ku raacsanahay fikirkani sababtoo ah Dawladdii Soomaaliyeed waxay lahayd Madaxweynaha oo ahaa 'Hoggaamiyaha Qaranka' iyo Raysal-wasaaraha oo ahaa 'Hoggaamiyaha Xukumadda'¹². Jamhuuriyadda Somaliland se waxay leedahay Madaxweyne qudha oo sida ku xusan Qodobka 90aad ee Dastuurka isku ah hoggaamiyaha Qaranka iyo Xukumaddaba. Farqiga u dhaxeeyaa wuxuu noqonayaa Madaxweynaha uu Xeerka Ciqaabta ka hadlayaa waa hoggaanka qaranka oo dusha looma saari karo eedaymaha xukumadda sababtoo ah Raysal-wasaaraha ayaa xukumadda hoggaamiya isaga ayaana lagala xisaabtamaa. Laakiin, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland isaga ayaa ah hoggaamiyaha Qaranka iyo Xukumaddaba sidaas darteed xaq baa loogu leeyahay in dusha loo saaro eedaymaha xukumadda iyo talaabo kasta oo ay xukumaddu qaado. Haddii kale qodobkani wuxuu qaban lahaa mucaaridku markay eedaymaha u soo jeedinayaan Madaxweynaha.

Ugu dambeyn, Xeerka Ciqaabtu wuxuu meel ka dhac ku yahay xoriyadda saxaafadda iyo fikirka xorta ah. Waxaana wanaagsan in aan loo adeegsan dacwaddaha saxaafadda khuseeya. Dacwaddaha saxaafadda loo haysto waxaa lagu dhaqmi karaa xeerarka madaniga ama xeer-hoosaadka anshax-marineed oo xoogan.

Soo Jeedimooyin

Si ay iskugu dheeli-tirnaadaan xorriyadda iyo anshaxa saxaafaddu, loona helo saxaafad madax-bannaan oo xor ah isla markaana aan sharciga ka talaabsanayn, waxaan soo jeedinayaan in la fuliyo arrimahani soo socda:

1. In la sameeyo Xeer madani ah oo khuseeya dacwaddaha saxaafadda isla markaana la xoojiyo xeer-hoosaadka anshaxa saxaafadda oo lagu daro qodobbo anshax-marin ah.
2. In wax ka badel lagu sameeyo Xeerka Saxaafadda oo lagu abbuuro Golaha Qaranka ee Saxaafadda (National Media Council) oo ka kooban dhawr xubnood oo hay'addaha kala duwan ee saxaafadda, dhawr xubnood oo suxifiyiin madax-bannaan ah, dhawr xubnood Goleyaasha Baarlamanka ah, Agaasime Waxaadyada Wasaaradda Warfaafinta iyo xubin Garyaqaan ah.
3. In Xeerka Saxaafadda laga dhigo Xeerka Saxaafadda Qoraalka ah oo keliya, warbaahinta kale ee Telefihanada iyo Raadyahana loo sameeyo xeerar gaar ah.

¹² Ibrahim Hashi Jama, "Using Insult Laws is an insult to Somaliland Media and Public – The Detention and Trial of *Haatuf* Journalist" 1/10/2007. www.somalilandlaw.com

4. In wax ka badel lagu sameeyo Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Madaniga sida ugu dhakhso badan uguna macquulsan (23 Sanno ayey Xeerarka Soomaaliya Maxkamaddaheenu ku shaqeeyaan) baarlamanka ayey hawshani u taalaa oo ay waajibaadkiisa tahay.
5. In la sameeyo xeer-hoosaadkii Maxkamadda Dastuuriga ah, si loo helo nidaam loo bilaabi karo dacwaddaha Dastuuriga ah.

Qalinkii: Cabdishakuur Cali Muxumed (Good Lawyer)